Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 3aad  Muqdisho,  2015  Lr. 2

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL
مكتب المحامي العام للدولة

**FAAFIN SANADLE**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

## KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**
**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

**SANADKA**

# 2015

SHARCI Lr. 07 Taariikh: 10/03/2015

OGGOLANSHO ANSIXINTA XUBNAHA GOLAHA WASIIRRADA & BARNAAMIJKA XUKUUMADDA OO KOOBAN

## MADAXWAYNAHA J.F.S.,

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad iyo Qodobka 87aad, Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu tixgaliyeey:** Soo Jeedinta Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed ee ku sumadeysan Ref: 630/3/1/9/15 kuna taariikheysan February 9, 2015

**Markuu Garwaaqsaday:** Baahida loo qabo in la dhiso Golaha Xukuumadda kadib markey Xukuumaddii hore meesha ka baxday oo Ra'iisul-Wasaare cusub La magacaabay si loo helo Xukuumad u adeegta dalka iyo dadka Soomaaliyeed

## Waxa uu Madaxweynhu soo saaray Shircigan:

### Qodobka 1

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaa la ansixiyey magacaabista Xubnaha Golaha wasiirrada, Wasiiru-dowlayaasha iyo Wasiirru-ku xigeennada iyo Barnaamijka Xukuumadda oo kooban:

| Tirsi | Magaca Wasiirka | Wasaaradda |
|---|---|---|
| 1- | Maxamed Cumar Carte | Ra'iisul Wasaare ku Xigeen |
| 2- | Cabdullaahi Axmed Jaamac "Ilka-Jiir" | Wasaaradda Cadaaladda |
| 3- | Cabdulqaadir Sheekh Cali Baqdaadi | Wasaaradda Awqaafta & Arrimaha Diinta |
| 4- | Cabdiraxmaan Maxamed Xuseen | Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Federaalka |
| 5- | Maxamed Aadan Ibraahim "Fargeeti" | Wasaaradda Maaliyadda |
| 6- | Cabdulqaadir Sheekh Cali Diini | Wasaaradda Gaashaandhigga |
| 7- | Cabdusalaam Hadliye Cumar | Wasaaradda Arrimaha Dibadda |
| 8- | Khadra Bashiir Cali | Wasaaradda Waxbarashada |
| 9- | Nuur Faarax Xirsi | Wasaaradda Dekedaha & Gaadiidka Badda |
| 10- | Cabdiraxmaan Yuusuf Cali Caynte | Wasaraadda Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga |
| 11- | Xuseen Maxamuud Sheekh Xuseen | Wasaaradda Dastuurka |
| 12- | Cali Axmed Jaamac "Jangali" | Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawada |
| 13- | Guuleed Xuseen C/Qaadir Qaasim | Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta |
| 14- | Axmed Xasan Gaboobe | Wasaaradda Beeraha |

| | | |
|---|---|---|
| 15- | Cabdiraxmaan Cabdi Cismaan | Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha |
| 16- | Saalax Sheekh Cusmaan Muuse | Wasaaradda Howlaha Guud & Dib-U-Dhiska |
| 17- | Sahra Maxamed Cali Samatar | Wasaaradda Haweenka & Horumarinta Xuquuqda Aadanaha |
| 18- | Maxamed Cumar Caymoy | Wasaaradda Kaluumaysiga & Kheyraadka Badda |
| 19- | Maxamed Mukhtaar Ibraahim | Wasaaradda Batroolka & Macdanta |
| 20- | Saciid Xuseen Ciid | Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Dhirta & Daaqa |
| 21- | Xaawo Xasan Maxamed | Wasaaradda Caafimaadka |
| 22- | Cabdirisaaq Cumar Maxamed | Wasaaradda Amniga Gudaha |
| 23- | Maxamed Xasan Aadan "shaahiyow" | Wasaaradda Korontada & Biyaha |
| 24- | Maxamed Cabdullaahi Xasan "Nuux" | Wasaaradda Dhalinyarada & Isboortiga |
| 25- | Maxamed Cabdi Xayir Maareeye | Wasaaradda Warfaafinta |
| 26- | Cabdiweli Ibraahim Sheekh Muudeey | Wasaaradda Shaqada & Shaqaalaha |

| Tirsi | Magaca Wasiiru-dowlaha | Wasaaradda |
|---|---|---|
| 1- | Khaalid Cumar Cali | Wasiiru-Dawlaha Wasaaradda Arrimaha Dibadda |
| 2- | Maxamed Cali Xagaa | Wasiiru-Dawlaha Wasaaradda Gaashaandhiga |
| 3- | Cabdullaahi Maxamed Nuur | Wasiiru-Dawlaha Wasaaradda Maaliyadda |
| 4- | Xasan Maxamed Jimcaale | Wasiiru-Dawlaha Wasaaradda Datuurka |
| 5- | Burci Maxamed Xamsa | Wasiiru-Dawlaha Xafiiska Ra'isul Wasaaraha Bii'adda (Deegaanka) |
| 6- | Caadil Sheegoow Sagaar | Wasiiru-dowlaha Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Ee Xiriirka Baarlamanka |
| 7- | Mahad Maxamed Salaad | Wasiiru-Dawlaha Madaxtooyada |
| 8- | Daa'uud Cabdikariim Cumar | Wasiiru-Dawlaha Wasaaradda Amniga Gudaha |
| 9- | Cabdullaahi Bile Nuur | Wasiiru-Dawlaha Wasaaradda Waxbarashada |
| 10- | Cabdirashiid Maxamed Xiddig | Wasiiru-dowlaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Federaalka |
| 11- | Maxamed Xasan Aadan | Wasiiru-dowlaha W. Ganacsiga & Warshadaha |
| 12- | Shariif Maxamed Xasan | Wasiiru-dowlaha Xafiiska Ra'iisulwasaaraha Ee Arrimaha dib U-habeynta Maaliyada |
| 13- | Maxamuud Cabdi Xasan (Pekos) | Wasiiru-dowlaha Wasaaradda Warfaafinta |
| 14- | Maxamed Isaaq Cusmaan (Fanax) | Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawada |
| 15- | Cabdiraxmaan Kulmiye Xirsi | Wasiiru-dowlaha Xafiiska Ra'iisulwasaaraha |

| Tirsi | Magaca Wasiir-ku xigeenka | Wasaaradda |
|---|---|---|
| 1. | Fahma Axmed Nuur | Wasaaradda Cadaalada |
| 2. | Macalin Cali Aadan Caddow | Wasaaradda Awqaafta & Arrimaha Diinta |
| 3. | Xaaji Cali Sh. Maxamed Nuur | Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Federaalka |
| 4. | Maxamuud Xayir Ibraahim | Wasaaradda Maaliyadda |
| 5. | Cabdalla Xuseen Cali | Wasaaradda Gaashaandhigga |
| 6. | Axmed Cali Kadiye | Wasaaradda Arrimaha Dibadda |
| 7. | Cabdinaasir Maxamed Cali | Wasaaradda Amniga Gudaha |
| 8. | Xaamud Cali Xasan | Wasaaradda Waxbarshada |
| 9. | Axmed Cusmaan Ibraahim (Daqarre) | Wasaaradda Dekedaha & Gaadiidka Badda |
| 10. | Cabdullaahi Shiikh Cali (Qaloocoow) | Wasaaradda Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga |
| 11. | Cabdullaahi Yuusuf Xasan (Alankey) | Wasaaradda Dastuurka |
| 12. | Cabdullaahi Colaad Rooble | Wasaaradda Warfaafinta |
| 13. | Xirsi Aadan Rooble | Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawada |
| 14. | Cusmaan Libaax Ibraahim | Wasaaradda Shaqada & Shaqaalaha |
| 15. | Jamaal Xasan Ismaaciil | Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta |
| 16. | Cabdicasiis Saalax Carmaan | Wasaaradda Beeraha |
| 17. | Cismaan Aadan Dhuuboow | Wasaaradda Dhalanyaradda Iyo Isboortiga |
| 18. | Maxamed Kheyroow Maxamed | Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha |
| 19. | Maxamed Cumar Geedi | Wasaaradda Howlaha Guud& Dib U-Dhiska |
| 20. | Muumina Shiikh Cumar | Wasaaradda Haweenka & Hormarinta Xuquuqda Aadanaha |
| 21. | Siciid Jaamac Maxamed Qaalib | Wasaaradda Kaluumeysiga & Kheyraadka Badda |
| 22. | Maxamed Axmed Kulan | Wasaaradda Batroolka & Macdanta |
| 23. | Cabdinaasir Maxamed Gaarane | Wasaaradda Xanaanada Xoolaha Dhirta & Daaqa |
| 24. | Cismaan Maxamed Cabdi (Daallo) | Wasaaradda Caafimaadka |
| 25. | Cabdixakiin Cige Guuleed | Wasaaradda Korontada iyo Biyaha |

## Qodobka 2aad

Waxauu Sharcigan dhaqangelayaa markii uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmigaee JFS.

MUQDISHO: 10/03/2015

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIWAAN GELIYEY
DIWAAN NO.
TAARIIKH
SAXIIXA NO.

**MADAXWEYNAHA J. F.S.**
**MUDANE XASAN SHEEKH MAXAMUUD**

بسم الله الرحمن الرحيم

***Mudane Guddoomiye,***
***Guddoomiye Ku-xigeennada,***
***Xildhibaannada sharafta leh,***
***Marti sharafta, Mudaneyaal iyo Marwooyin,***
***Asalaamu Caliykum Waraxmatullahi Wabarkaatuhu,***

Ugu horeyn, waxaan u mahad-celinayaa Golaha shacabka, oo i siiyey codkooda kalsoonida 24$^{kii}$ bishii aynu soo dhaafnay ee Disember 2014. Waxaan si gaar ah u xusayaa soo dhaweyntii, Guubaabadii iyo kalsoonidii buuxday oo aan idinka helay kulankaas.

Waxaa sharaf ii ah inaan mar kale hortiinna imaado si aan u fuliyo balanqaadkii ahaa in aan muddo kooban Golaha Wasiirada iyo Barnaamijka Xukuumadda idin horkeeno, si aad u siisaan codka kalsoonida. Xukuumadda aan soo dhisay waa mid loo dhan yahay oo matasha qeybaha kala duwan ee Shacabka Soomaaliyeed. Waa Xukuumad ku saleysan helitaanka xasilooni siyaasadeed, tixgelin ra'yiyada kala duwan, iyo daradar-gelinta hawlaha horyaala Xukuumadda.

Barnaamijka xukuumadda ee aan maantay idinla wadaagayo waa mid kooban, waxaase ka dambeyn doona barnaamijkii qorshaha Xukuumadda ee sanadadka 2015 kaasoo noqon doona mid tafatiran, kana tarjumaya baahida iyo howlaha mudnaanta u leh xukuumadda, lehna waqti cayiman iyo awooddii fulinta.

**Gudoonka Golaha shacabka, Xildhibaanada sharafta leh, Mudaneyaal iyo Marwooyin.**

- Sanadkaan bilowga ah ee 2015 waa sanad ay na horyaalaan hawlo aad muhiim u ah saameyn dheerna ku yeelan doona dib u hanashada xasiloonida dalka, dawlad-wanaaga, demoqraadiyadda, iyo horumarka Dalka
- Waa sanad waxqabad oo nalakaga fadhiyo dardar-galinta hiigsiga 2016 iyo hawlaha kale ee ahmiyadda koowaad u leh Dawladda.
- Waa sanad ay tahay inaan ku hagno dalkeena wadada horumarka, cadaaladda iyo demoqraadiyadda.
- Marka laga reebo hiigsiga 2016 sandadkaan 2015 waxaa kaloo na horyaala hawlo culus oo u baahan in wax laga qabto sida:
    - *Xoreynta dhulka kooban ee weli ku haray Gacanta Nabad-diidka;*
    - *Dhamaysitirka dhisadda maamul-goboleedyada ku meel gaar ka ah ee harsan;*

- *Baahinta adeega bulshada oo hada bilaw ah, welina aan gaarin gobolada dalka oo dhan;*
- *Gaarsiinta Cadaaladda iyo garsoorka heerkii laga rabay;*
- *Horumarinta barnaamijka dhaqaalaha iyo shaqo-abuurka;*
- *Gaarsiinta Dawlad wanaaga iyo tayada hay'adaha Dowladda heer sare;*

**Sidaa awgeed xildhibaanada sharafta leh, waxaan ka codsanayaa in Goloha Wasiirada cusub la siiyo codka kalsoonida, si hawlahaas aan u dardar-gelino muddada yar ee ka hartay waqtigii loo cayimay.**

***Xildhibaanada sharafta leh,***

- Sidaan horey u xusay, Xukuumaddaan waa mid matasha qeybaha kala duwan ee Shacabka Soomaaliyeeed.
- Xukuumadda siyaasadeedu waxay ku salaysanaan doontaa nidaamka Dawlad wanaagga, isla xisaabtanka, hufnaanta iyo sareynta sharciga.
- Xukuumaddu waxay dhiirigelin doontaa wadatashi iyo wadashaqeyn joogta ah ee dhexmara madaxda dalka heer Federal iyo heer Dawlad-Goboleed, iyadoo mar walba la eegayo danta guud ee dalka iyo dadka Soomaaliyeed.
- Hawlaha ugu horeeya ee aan mudnaanta siin-doono waxaa ka mid ah:
  - **Xasilooonida siyaasadda**
  - **Dhameystirka Dib-u-Heshiisiinta**
  - **Fulinta hiigsiga 2016[ka]**
  - **Adkeynta amniga**
  - **Horumarinta cadaaladda**
  - **La-dagaalanka musuqmaasuqa**
  - **Kobcinta kaabayaasha dhaqaalaha iyo dakhliga Dawladda**
  - **Kordhinta adeegga bulshada**
  - **Dardar-glinta Dawlad Wanaagga**
  - **Iyo dib-u-dhisidda iyo dib-u-habeynta Hay'adaha Dawladda**

## XASILOONIDA SIYAASADDA

**Xildhibaanada Sharafta leh,**

Siyaasad xasiloon oo isfaham leh, una dhaxeysa hoggaanka Dalka, Dawladda iyo Golaha Shacabka, heer Federal iyo heer Dawlad-goboleed, waxay fududeynaysaa dib-u-hanashada kalsoonida Shacabka Soomaaliyeed.

Xasilooni la'aanta siyaasaddu, waxay halis gelin kartaa, horumarkii Dawladnimo ee aan gaarnay sanadihii la soo dhaafay.

- Sidaa awgeed, waxaan dhiirigelin doonaa, wadatashi iyo wadashaqayn joogta ah, iyadoo marwalba la eegayo danta guud ee dalka iyo dadka Soomaaliyeed

- Diyaarinta, ansixinta iyo meel-marinta shuruucda iyo siyaasadda Xukuumadda, iyo waqtiga kooban ee aynu haysano, ayaa muqaddas ka dhigaya wadashaqayn iyo xiriir joogta ah oo u dhaxeeya Hoggaanka Dalka, Golaha Shacabka, iyo Dawlad-goboleedyada.

## DIB-U-HESHIISIINTA

Shaki kuma jiro in sanadihii u dambeeyay arrimaha dib-u-heshiisiinta wax badani ka qabsoomeen. Hadana wali lama gaarin in si buuxda ay Shacabka Soomaaliyeed isku aaminaan iskuna caafiyaan.

- Sida awgeed, waxaan soo bandhigi doonaa siyaasadda lagu dhameystirayo dib-u-heshiisiinta iyo waddada loo marayo fulinta siyaasaaddaas, iyadoo lala tashanayo lalana shaqeynayo Golaha Shacabka, Dawlad-goboleedyada iyo qaybaha kala duwan ee bulshada
- Waxaan dhisi doonaa guddi khubaro ah oo talo bixin ka sameeya siyaasadda lagu dhameystirayo dib-u-heshiisiinta iyo habka iyo waddada ugu haboon oo loo fulin karo siyaasaddaas.
- Xukuumaddaydu waxay dardar-gelin doontaa hawlaha guddiga madaxabanaan ee Dib-u-heshiisiinta sida ku xusan dastuurka.

## HIIGSIGA 2016

**Xildhibaanada sharafta leh,**

Waxaan ku dhaqaaqi doonaa fulinta hiigsiga 2016[ka] si loo gaaro demoqaraadiyad buuxda waqtiga u harsan Xukuumadda iyo Golaha Shacabka. Waxaad la socotaan in nalooga fadhiyo ansixinta iyo hirgelinta sharciyo iyo guddiyo muhiim u ah fulinta hiigsiga 2016[ka].

Waxaan dhisi doonaa sida ugu dhaqsiyaha badan guddi qiimeyn kusoo sameeya heerka fulinta hiigsiga 2016[ka] uu marayo soona diyaariya qorshaha iyo habka dhameystirka fulinta hiigsiga 2016[ka].

- Xukuumaddu waxay muhiimad siin doontaa dhisidda, guddiga kormeeridda iyo iskuxirka fulinta hiigsiga 2016[ka] kaasoo si toos ah u hoos imaan doona xafiiskeyga lana shaqeyn doona dhammaan hay'adaha Dawladda iyo Golaha Shacabka.
- Xukuumaddu waxay dardar-gelin doontaa dhisidda guddiga farsamada fulinta hiigsiga 2016[ka] "Technical Team", oo hawshoodu tahay sidii si hufan oo waqtiyaysan loogu fulin lahaa hawlaha hiigsiga 2016[ka].
- Xukuumaddu waxay muhiimad gaar ah siin doontaa wadatashiyada iyo wadashaqeynta Golaha Shacabka si loo dhameystiro sharciyada iyo Guddiyada madax-banaan ee dustuuriga ah iyo kuwa la xiriira hiigsiga 2016 ee dhiman.

- Xukuumaddu waxay ka shaqeyn-doontaa hawl-galinta guddiyada madax-banaan ee dustuurka ah iyo kuwa la xiriira hiigsiga 2016 ee dhisan si ay wajibaadkooda u gutaan.
- Xukuumaddu waxay sii wadi doontaa wadatashiyada iyo dhameystirka dhismaha dowlad-goboleedyada KMG ah ee harsan.

**Xildhibaanada Sharafta leh,**

Waxaan mar labaad halkaan ka cadeynayaa in hiigsiga 2016[ka] iyo fulinta hawlaha baaxadda leh ee ina horyaal ku hirgeli karaan oo kaliya wada shaqayn iyo wadatashi dhexmara hoggaanka Dalka, Dawladda iyo Golaha Shacabka.

## ADKEYNTA AMNIGA

Marka hore, waxaan hambalyo iyo bogaadin u dirayaa dhammaan ciidamada iyo hawl-wadeenada ku lugta leh sugidda Amniga oo dhawaan guulo wax ku ool ah kasoo hooyay xoreynta dhulkii ku harsanaa gacanta argagixisada. Waxaa kaloo u hambalyeynayaa ciidamada AMISOM oo marwaliba garab taagan ciidankeena Amniga iyo sugidda xasiloonida dalka.

Amnigu wuxuu aas aas u yahay horumar walba oo aynu hiigsaneyno. Sidoo kale sugidda Amnigu waa adeegga iyo waajibka ugu horeeya ee saaran Dawladda. Hiigsiga Xukuumaddeyda ee dhanka amniga waxaa sal u ah gaaritaanka dhismaha hay'ado amni oo mideysan, tayo leh, wadashaqeyn leh, isla-xisaabtan leh, dhowrana xuquuqda muwaadinka, kana turjuma rabitaanka dhammaan qaybaha kala duwan ee Shacabka Soomaaliyeed ugu dambeyna keena gaaritaan isku-filnaasho sugidda Amniga oo gaarsiisan dalka oo dhan.

Si Hiigsigaas loo gaaro, Xukuumaddu waxay sii xoojin doontaa hawlaha amniga ee hadda socda waxayna sidoo kale qaadaysaa talaabooyin cusub sidii loo sii adkeyn lahaa Amniga. Xukuumadda waxay muhiimad siin doontaa:

Dhameystirka xoraynta dhulka kooban ee ku haray gacanta argagixisida iyo xasilinta magaalooyinka dhawaan la xoreeyay.

- Dib-u-eegis lagu sameeyo siyaasadda, isteraatiijiyadda iyo baahida Amniga guud ee dalka ee xiligaan.
- Dib-u-eegis iyo dib-u-habayn lagu sameeyo qaab-dhismeedka iyo shuruucda ay ku dhisan yihiin hay'adaha amniga si ay ula jaanqaadaan dastuurka, sharciyada iyo dhawrista xaquuqul insaanka.
- Kor-u-qaadidda awoodda waxqabad ee hay'adaha ka shaqeeya amniga, si ay waajibaadkooda u gutaan iyadoo la dhowrayo xuquuqda Aadanaha iyo xeerarka caalimiga ah, sida in aan la ciidameyn caruurta oo kale

- Dajinta siyaasaddii iyo barnaamijkii fulinta ee isku dhafidda ciidamada heer federal iyo mid dawlad-goboleedyadaba si loo helo ciidan aan ku dhisnayn hayb ama kooxaysi oo u adeega shacabka Soomaaliyeed, lehna anshixii, tababarkii, iyo tayadii ciidan.
- Waxaan sioo kale muhiimad siin doonaa dib-u-dhiska ciidamada amniga si loo helo ciidan tayo leh, qalabaysan oo leh tababarkii loo baahnaa, hanan kara sugidda amaanka gudaha iyo xuduudaha dalka. Ciidankaas oo u diyaarsanaan doona gudashada waajibaadkooda, kalana wareegi doona hawlaha amniga ciidamada AMISOM markii uu waqtigoodu dhamaado.
- Waxaa sidoo kale muhiim ah xaqiijinta tirada iyo tayada ciidanka si loo sugo xuquuqahooda sida: mushaarka, deegaanka iyo daryeel nololeedkooda, caafimaadkooda oo ay ku jiraan hawlgabka naafada iyo agoonta.
- Xakuumaddu waxay adkeyn doontaa la dagaalanka argagixisada si waafaq-san sharciyada Dalka iyo kuwo caalamiga ah.
- Xukuumaddu waxay daraasad ka sameyn-doontaa baahida iyo caqabadaha amniga ee shacabku tabanayo si waxqabad muuqda looga gaaro.
- Sugidda amniga waxaa marwalba garab-socon doona barnaamijyo sahlaya kor-u-qaadidda iyo dhawrista xuquuqda Aadanaha iyo isku-xirka xafiisyada qaabilsan xuquuqda Aadanaha.

## XUQUUQDA AADANAHA

Dhowridda Xuquuqda Aadamaha gaar ahaan dumarka iyo caruurta waxay muhiimad weyn u leedahay Xukuumaddeyda iyo Caalamkaba. Waxaa jira eedeymo soo laalaabanaya ee ku aadan xadgudubyo xuquuqda dumarka Soomaaliyeed. Dumarka Soomaaliyeed waxay lafdhabar u yihiin nolosha iyo jirtaanka bulshada waxaa Xukuumadda iyo dhammaan shacabka Soomaaliyeed muqadas ku ah xushmeynta iyo ilaalinta xuquuqda dumarka iyo caruurta. Sidaa daraadeed:

- Xukuumaddu waxay bilaabi doontaa wadatashiyo, wacyi-galin iyo abaabulo ku aadan horumarinta xuquuqul insaanka gaar ahaanna dumarka.
- Xukuumaddu waxay qiimeyn ku sameyn doontaa baaxadda eedaymaha xadgudubyada xuquuqda dumarka Soomaaliyeed iyo talaabooyinka wax looga qaban karo.

- Waxaan dardar-galin doonaa hawl-galka guddiga madaxa-banaan ee xaquuqda aadanaha, kadib marka sharcigiisa la ansixiyo.
- Waxaan hubin doonaa in hawlaha lagu sugayo amniga iyo dhawrista xuquuqda aadanaha ay wada socdaan isna kabaan.
- Waxaan waafajin doonnaa sharciyada, siyaasadda, iyo barnaamijyada Xukuumadda dhowritaanka xuquuqda aadanaha.

## CADAALADDA

**Xildhibaanada sharafta leh,**

Markii ay bur-burtay Dowladdii dhexe waxaa bur-bur ku yimid nidaamkii cadaaladda iyo sarreynta sharciga. Bur-burku kuma koobnayn dhismayaashii saldhiga u ahaa garsoorka. Waxaa kaloo meesha ka baxay raadkii cadaaladda.

Qaybaha ugu muhiimsan ee hawlaha cadaaladda iyo garsoorka waxaa ka mid ah:

- Dhamaystirka Dastuurka oo ah tiirka ugu muhiimsan tiirarka hiigsiga 2016.
- Sidaa daraadeed, Xukuumaddu waxay ku dhaqaaqi doontaa howl-galinta guddiga madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo hirgelinta dastuurka.
- Si hawshaas baaxadda leh loo gaaro waa lagama maarmaan, in dhammaan qaybaha bulshada Soomaaliyeed sida Ururada Bulshada Rayidka ah, Culumaa'udiinka iyo Dhalinyaradu ay qayb ka noqdaan. Waxaa muhiim ah in ay hawshaas hormood ka noqdaan Hay'adaha Qaranka oo dhami oo ay ugu horeeyaan Golaha Shacabka iyo Xukuumadda.

- Xukuumadaydu waxay dib-u-habeyn ku sameynaysaa nidaamka garsoorka, waxayna ahmiyad weyn siin doontaa dib-u-habaynta Golaha Adeegga Garsoorka.
- Xukuumaddu waxay ka shaqeyn doontaa dhisidda iyo hawl-bilaabidda Maxkamadda Dastuurka.
- Xukuumadaydu waxay sameyn doontaa guddi khubaro sharci yaqaano ah oo dib u eega dhamaan xeerarka iyo shuruucda dalka si loo waafajiyo dastuurka iyo sharciga xuquuqda aadamaha.
- Xukuumaddu waxay daraasad ka sameyn doontaa baahida iyo caqabadaha adeega garsoorka ee shacabku tabanayo si waxqabad muuqda looga sameeyo.

## DHAQAALAHA

Sanadihii ugu dambeeyay dhaqaalaha dalka wuxuu ahaa mid soo kabsanayey, balse aan gaarsiisneyn heerkii laga rabay sida sharciyadii oo aan dhameystirneyn, shaqo abuurkii oo kooban, maalgashigii oo weli yar, iyo xirfaddii hawl-wadeennada iyo shaqaalaha oo hooseysa.

Si wax looga qabto arrimaha kor ku xusan:

- Xukuumaddu waxay dardar-galin doontaa dhameystirka iyo hirgalinta sharciyada, siyaasadaha, istiraatiijiyaha mudnaanta hore leh ee la xariira dhaqaalaha.
- Xukuumaddu waxay ka shaqeyn doontaa kobcinta kaabayaasha dhaqaalaha iyo dhiiri-galinta dhaqdhaqaaqa ganacsiga.
- Xukuumaddu waxay ahmiyad siin doontaa, horumarinta wax-soo-saarka beeraha, xoolaha, kalluumeysiga iyo qaybaha kale ee lafdhabarka u ah wax-soo-saarka, horumarinta iyo dhaqaalaha dalka.
- Xukuumaddu waxay muhiimad siinaysaa in miisaaniyadda Dalka loo adeegsado sidii loogu talagalay iyadoo loo marayo dhaqan-gelinta nidaam maaliyadeed hufan.
- Xukuumaddu waxay baahin doontaa canshuur qaadidda iyadoo isla markaana xoojineysa hab maamulka iyo maareynta dakhliga canshuuraha.
- Xukuumaddu waxay hirgalineysaa hab dhaqan maaliyadeed casri ah, lagulana dagaalamayo musuqmaasuqa. Waana nidaam fududayn doona Bixinta kharashaadka Dawladda.
- Xukuumaddu waxay xoojineysaa awoodda kormeer ee Xisaabiyaha Guud iyo madaxbanaanida Hanti dhowrka Qaranka.

## ADEEGA BULSHADA

Sidaad wada ogtihiin, adeegga bulshadu muddo dheer ayuu maqnaa sababna waxaa u ahaa colaadii iyo Dawlad la'aantii saameysay Dalka muddada dheer.

Nasiib wanaag, inkastoo heerkii la rabay aan la gaarin, hadana adeeggii bulshadu dib ayuu u soo laabtay si bilow ah.

- Xukuumaddu waxay dhameystiri doontaa sharciyada siyaasadaha iyo istiraajiiyadaha mudnaanta hore leh ee la xiriira adeegga bulshada.

- Xukuumaddu waxay xoojin doontaa baahinta addeegga bulshada ee dhanka amaanka, cadaaladda, waxbarashada, caafimaadka, helitaankaa biyo nadiif ah iyo adeegyada dhalinyarada.
- Waxaa muhiimad gaar ah la siin doonaa gaarsiinta adeegga bulshada gobolada gaar ahaan goobaha dhawaan laga xoreeyey nabad-diidka.
- Waxaa kaloo muhiimad la siin doonaa horumarinta waxbarasho mideysan tayana leh. Sidoo kale, horumarinta Af-Soomaaliga taariikhda Dalka iyo Dadka iyo Hiddaha iyo dhaqanku waxay qeyb weyn ka noqon doonaan barnaamijka waxbarashada ee Xukuumadda
- Waxaa sidoo kale muhiimad gaar ah la siin doonaa hoggaanka iyo xeerarka adeegga caafimaadka, xog ururinta iyo qorshaynta caafimaadka dadweynaha iyo nidaamka Bixinta adeegga caafimaadka.
- Waxay Xukuumaddu siin doontaa ahmiyad gaar ah adeegga caafimaad ee caruurta, hooyooyinka, barakacaasha, iyo dadka danyarta ah.
- Waxay Xukuumaddu dardar-galin doontaa barnaamijka dib u soo celinta qaxootiga iyo dib u dajinta barakacayaasha.
- Waxaanu abuuri doonaa barnaamijyo iyo tababarro dhalinyarada si ay mustaqbal wanaagsan u helaan ugana fogaadaan anshax xumada iyo falalka guracan.

## DAWLAD WANAAGGA

**Xildhibaanada sharafta leh,**

Waxaan ogsoonahay in burbur baaxad weyn uu soo gaaray Dawlad wanaaggii iyo hay'adihii dawligaba mudadii aan ku jirnay xasilooni darrada iyo dawlad la'aanta.

Dawlad wanaagga iyo dhisidda tayada hay'adaha dawladduba waxay lafdhabar u yihiin hiigsiga iyo fulinta barnaamijyada Xukuumadda.

sidaa darted, Xukuumaddu waxay qaadi doontaa talaabooyinka soo socda:

- Xukuumada waxay dhameystireysaa sharciyada iyo siyaadda Dawliga ah iyo hogaanka qaab dhismeedka maamulka. Xukuumadda waxay si qeexan oo tafatiran u soo bandhigi doontaa mas'uuliyadaha Hay'adaha Dawliga ah.
- Xukuumadda waxay ka shaqeyn doontaa isku xirka siyaasadaha Hey'adaha Dawliga ah.
- Xukuumaddu waxay adkeyn doontaa ilaalinta hantida dadweynaha iyo la dagaalanka musuqmaasuqa.

- Xukuumaddu waxay dib u habeen ku sameyn doontaa maareynta iyo hab maamuuska shaqaalaha rayidka si tayadooda, xirfadooda iyo waxqabadkooda kor loogu qaado.
- Xukuumaddu waxay ku dadaali doontaa abuuridda jawi ay hawl-wadeennada Dawladadu ku gutaan shaqadooda si hufan oo ku saleysan raali galinta iyo buuxinta baahida shacabka.
- Si taas loo gaaro, waxaan muhiimad gaar ah siinayaa dhisidda guddi khubara ah oo tala-bixin ka diyaariya sidii loo gaari lahaa Dawlad-wanaag loona abuuri lahaa Dawlad kalsooni iyo taakulayn ka heysata shacabkeeda, kana hortagta waxyaabaha keena Dawladnimo xumida sida cadaalad darrada, musuqmaasuqa, takrifalka iyo wixii la mid ah.
- Si loo helo hay'ado iyo shaqaale si hufnaan ah u gudan kara xilkooda iyo waajibaadkooda, kuna saleysan aqoonta iyo xirfadda shaqaalaha si loo gaaro in shaqo kasta uu qabto qofkii ugu haboonaa, waxaan dib u habeyn ku sameyn doonaa habka shaqaaleynta iyo dalacsiinta shaqaalaha Dawladda.
- Waxaan ka faa'idaysan doonnaa aqoon yahaannada iyo xirfadleyda Soomaaliyeed ee gudaha iyo dibadda dalka ku sugan, si aan u kordhino tayada hoggaanka iyo maamulayaasha hay'adaha iyo wax soo saarka shaqaalaha Dawladda.
- Waxaan ku kabi doonnaa hay'adaha Dawladda iyo kuwa Dawlad Goboleedyada, khubaro ka caawiya xirfadaha gaarka ah, tababarka shaqaalaha, dhisidda iyo kobcinta tayada hay'daha.

## GABOGABO

**Guddoonka Golaha Shacabka, Xildhibaannada sharafta leh, Mudanayaal iyo marwooyin:**

Ugu dambeyntii, si Xukuumaddu u bilawdo fulinta barnaamijka iyo howlaha baaxadda leh ee ina horyaala uguna horeyso hiigsiga 2016, waxaan si xushmad ku dheehan tahay Golaha Shacabka uga codsanayaa in aad codkiina kalsoonida siisaan Golaha Wasiirrada ee Xukuumaddeyda cusub.

**Waad mahadsan tihiin**
**Wabilaahi Towfiiq**